IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريده الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 30 Dis. 1981 L. 4R12

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L.67 ee 29 Dis. 1981, Ijaarka ma guurtooyinka loo isticmaalo dan Ganacsi. BOG. 1833

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 74 ee 5 Luulyo 1981. Dallaacd Shaqaale » 1848

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 75 ee 19 Luulyo 1981, Darajo Beddelaad. » 1850

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 76 ee 30 Agoosto 1981, Dib u sixid Xeerka Lamb. DH. MG/XQ/01.81. » 1852

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 77 ee 30 Agoosto 1981. Dallacaad G/Dhexe Cali Xasan Maxamuud. » 1854

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 67 ee 29 Disembar 1981. Ijaar ka maguurtooyinka loo isticmaalo dan Ganacsi.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Ijaarka maguurtooyinka

### Qod. 1aad

(Heshiiska Ijaarka)

1. Ijaarka maguurtooyinka loo isticmaalo dan ganacsi, ama dan bulshadeed oo ka duwan hoy, waxaa nidaaminaya Sharcigan, Xeerka Madaniga, qodobbadiisa aan ka soo horjeedin Sharcigan, iyo heshiiska dhex mara kireeyaha iyo kireystaha.

2. Waa wax kama jiraan heshiisyada, ama qayb kastoo iyagaas ka mid ah, oo ka hor imaanaya Sharcigan.

3. Sharcigan lagu dhaqi maayo ijaarka guryaha ku yaal magaalooyinka dadka deggani ay ka yar yi hiin 10.000 oo ruux, iyo guryaha ka sameysan baraa ko, cariish, mundul, iwm. oo loogu isticmaalo hawl ganacsi aan warshad ahayn.

### Qod. 2aad

(Muddada Ijaarka)

1. Maguurtooyinka ganacsiga, waxaa loo kala saaray warshado, hoteello, farmashiyeyaal, farshaxanno, ganacsi kale iyo hawl kastoo madax bannaan.

2. Muddada ijaarka iyo sii ijaaridda maguurtooyinka lagu sheegay xubinta koowaad kama yaraan karto inta soo socota:

a) warshadaha, hoteellada iyo farmaashiyeyaasha: sagaal sano;

b) farshaxannada, ganacsiga kale iyo hawl kasto madax bannaan: afar sano.

3. Haddii lagu heshiiyo muddo inta ka yar, ama aan muddaba la qabsan, waxaa loo qaadanayaa in lagu heshiiyey muddada ijaarka ku sheegan xubinta hore.

4. Waxaa lagu heshiin karaa muddo intaa ka gaaban marka hawlaha lagu fulinayo maguurtada ay leeyihiin, nuxur ahaan, dabeecad ku meel gaar ah.

5. Haddii heshiiska ijaarku uu leeyahay dabeecad xilliyeed, Kireeyuhu waa in uu maguurtada ka ijaaraa, isla xilliga sannadka xiga, kireystihii hore, haddii uu warqad xafidan ku soo codsado inta ayan dhammaan muddada heshiisku. Waajibkaas kireeyaha saaran wuxuu soconayaa ugu badnaan afar sano oo is-xigta, ama sagaal sano marka maguurtada loogu isticmaalo hoteel, warshad ama farmashiye.

6. Dhinacyadu waa ku heshiin karaan in kireystuhu ka bixi karo heshiiska ijaarka waqti kasta, isagoo warqad xafidan ku ogeysiinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda ka bixidda.

7. Marka ay jirto sabab dhab ah oo la garowsan karo, xataa haddii lagu heshiiyo si ka duwan, kireystuhu waa ka bixi karaa heshiiska isagoo digniin siinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor, wuxuuna ku gaarsiinayaa warqad xafidan.

8. Marka Sharcigan laga hadlayo:

a) hoteel waxaa loola jeedaa meelaha la seexdo ee ka kooban ugu yaraan sagaal qol jiif ah;

b) warshad waxaa loola jeedaa meel kasta oo ay ku rakiban yihiin in ka badan hal makiino oo looga shaqeeyo beddelaadda alaabta cev-

riin, ama lagu dhammeystiro alaab warshadeyn hore soo martay, dhanka qiimo dhaca marka la eegana muddo afar sano ka badan u baahan, waxaana tilmaamaya sharci gaar ah.

Qod. 3aad

(Cusbooneysiinta heshiiska ijaarka)

1. Heshiisyada ijaarka maguurtooyinka loogu isticmaalo hawlaha ku tilmaaman Qodobka 2aad, xubintiisa labaad, xarfaha (a) iyo (b), waxay u cusboonaanayaan muddo la eg inta ku xusan isla qodobkaas.

2. Cusbooneyntaas ma dhaqan geleyso haddii labada dhinac midkood uu dhinaca kale ku gaarsiiyo, warqad xafidan, ogeysiis ka bixid heshiis ah, iyadoo la siinayo muddooyinka hoos ku tilmaaman:

a) warshadaha, hoteellada iyo farmashiyeyaasha: 18 bilood;

b) farshaxannada, ganacsiga kale iyo hawl kasto madax bannaan: 12 bilood.

3. Dhammaadka heshiiska ugu horreeya, kireeyuhu wuxuu diidi karaa in uu cusbooneysiiyo heshiiska, marka ay jirto xaalad ka mid ah xaaladaha ku tilmaaman Qodobka 4aad ee Sharcigan, iyadoo la dhowrayo habka iyo waqtiyada isla qodobkaas ku xusan.

Qod. 4aad

DIIDID CUSBOONEYSIIN HESHIIS

1. Marka ay dhammaato muddada heshiiska u horreeya, xaalad ka mid ah xaaladaha soo socdana la helo, kireeyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu diido cusbooneysiinta heshiiska ijaarka:

a) marka uu rabo in maguurtada ay u isticmaalaan isaga, xilihiisa ama carruurtiisu, hoy ay degaan;

b) marka uu rabo in maguurtada ay u isticmaalaan meel ay ku qabsadaan isaga, xilihiisa

taan heshiiska la baabi'inin. Waxaa intaas u dheer magdhowga ku tilmaaman Qodobka 8aad.

2· Dib u soo nooleynta heshiiska, ama magdhabidda khasaare ka sokow, kireeyaha waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 10.000 ilaa Sh, So, 50,000

3. Go'aanka ganaaxa waxaa soo saareysa Max kamadda qaadday dacwadda madaniga ah.

Qod. 7aad

(Dheellitirka ijaarka)

1. Qiimaha ijaarka lagu heshiiyey halkiisii ayuu taagnaanayaa saddexda sano oo u horeysa ee mudada heshiiska, lagamana hadli karo dheellitirka isbedde laadda ku dhici kara awoodda iibka ee Shilinka.

2. Dhinacyadu waa ku heshiin karaan, laga bil laabo sannadka afaraad, in ay dib u eegaan, dheelli tiriinna qiimaha kiraha, iyadoo laga duulayo isbed delka ku dhaco awoodda iibka ee Shilinka Labadii sano u dambeysay. Wixii ka dambeeya, labadii sanaba mar waa bannaan tahay in laga wado hadlo dheelli tirkaas.

3. Kororsiimada dheellitirka qiimaha ijaarka ka mo badnaan karo boqolkiiba shan iyo toban (15%) markiiba.

Qd· 8aad

(Magdhow)

1. Marka uu go'o xiriirka ijaarka maguurtooyin ka ku sheegay Qodobka 2aad sababtuna ayan ahayn mid kireystuhu uu leeyahay (gudasho karid la'aan xilkii saarnaa, ka bixid heshiis ijaar, Iwm.) kireysta ha ku haystay maguurtada hawl ka mid ah kuwa ku tilmaaman Qodobka 2aad, wuxuu xaq u yeelanayaa magdhow la mid ah 18 bilood kiradooda hadii ma guurtadu hoteel ahayd, ama warshad ama farmashi-

2. Kireystuhu wuxuu kaloo xaq u yeelanayaa magdhow dheeraad ah oo gaaraya inta ku kala xusan xubinta hore, marka maguurtada loogu isticmaalo, qof kasta ha ku isticmaalee, muddo sannad ah gudaheed, laga billaabo maalinta la banneeyey, isla hawlihii kireystihii hore uu meesha ku hayey ama mid la nooc ah.

3. Fulinta go'aanka banneynta maguurtada waxaa shardi u ah in la bixiyo magdhowga xubinta koowaad ku sheegan. Magdhowga ku tilmaaman xubinta labaad, waxaa la bixinayaa bilowga hawsha cusub.

Qod. 9aad

(Ka reebid)

1. Axkaanta qodobka hore lagu dhaqi maayo go'idda xiriirka ijaarka ku saabsan maguurtooyinka loo isticmaalo hawlo aan keeneynin in xiriir toos ah lala yeesho dadweynaha, iyo kuwa loo isticmaalo xirfado mihnadeed ama leh dabeecad ku meel gaar ah, iyo guryaha ku dhex yaal dekedaha, gegida dayuuradaha, saldhigyada baabuurta, hoteellada iyo tuulooyinka dalxiiska, xarumaha goobaha shaqada iyo naadiyada isboortiga.

2. Sidoo kale lagu dhaqi maayo maguurtooyinka Dawladda ama hay'adaha Dawladdu ijaaraan, marka ay Dawladda ama Hay'adaheedu ku qabsanayaan dan ka mid ah danahooda caamka ah. Xaaladdan dambe, kireystaha waa in la siiyaa waqti macquul ah oo uu ku banneeyo.

Qod. 10aad

(Sii-ijaaridda iyo wareejinta heshiiska ijaarka)

1. Kireystuhu waa sii ijaari karaa maguurtada, ama waa wareejin karaa heshiiska ijaarka, xataa isaga oo aan la tashaan kireeyaha, waxaase shardi ah in heshiiska lala wareejiyo, ama lala ijaaro, hawshii maguurtada lagu hayey, isla markaana la wargeliyo kireeyaha, looguna sheego warqad xafidan oo jawaabcelin leh.

2. Marka ay jiraan sababo dhab ah oo la garowsan karo, kireeyuhu wuxuu geysan karaa ishortaag, soddon maalmood gudahood, laga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska.

3. Xaaladaha heshiis wareejinta, kireeyuhu waa dacweysan karaa wareejiyaha, hadduusan ka madax banneyn culeyskaas, marka loo-wareejiyuhu gudan waayo xilkii uu qaaday.

4. Magdhowga ku sheegan Qod. 8aad, waxaa yeelanaya kireystaha u dambeeya.

Qod. 11aad

(Dhaxalka heshiiska)

1. Kireystaha waxaa heshiiska ka dhexlaya kuwa xaqa u leh in ay sii wadaan hawlaha maguurtada lagu hayey.

2. Haddii maguurtada ay isticmaalayeen mihnadlayaal, farshaxanno ama ganacsadayaal badan, kireystuhuna uu ahaa mid iyagaas ka mid ah, marka uu dhinto waxaa wadajir heshiiska uga dhaxlaya kuwa xaqa u leh in ay shaqada qofka dhintay sii wadaan iyo mihnadlayaasha, farshaxannada ama ganacsatada kale.

3. Haddii kireystuhu uu heshiiska ka baxo, waxaa heshiiska la wareegaya mihnadlayaasha, farshaxannada iyo ganacsatada kale. Kireeyuhu wuxuu ka geysan karaa ishortaag la wareegidda heshiiska, marka ay jiraan sababo dhab ah oo la garowsan karo, wuxuuna u marayaa habka ku sheegan qodobka hore.

Qod. 12aad

(Xaqa kala horreynta

1. Kireeyuhu, marka uu doono inuu maguurtada kireysan iib ku wareejiyo, waa in uu kireystaha qoraal ku ogeysiiyaa isagoo u marinaaya Gaarsiiyaha Maxkamadda.

2. Ogeysiiska waa in lagu sheegaa qiimaha loo joogo oo lacageysan, iyo shuruudaha kale ee beecu ku guntamayo, waana in uu weydiiyaa kireystaha inuu rabo iyo in kale ka faa'iideysiga xaqa kala horreeynta.

3. Kireystuhu waa in uu ku isticmaalaa xaqa kala horreynta soddon maalmood gudahood, laga billaabo taariikhda uu helay ogeysiiska, wuxuuna ku caddeynaya qoraal ku socda milkiilaha oo loo marsiinayo Gaarsiiyaha Maxkamadda, uuna ku caddeynayo inuu maguurtada kula wareegayo shuruudo la mid ah kuwa loo soo bandhigay.

4. Kireystuhu, marka uu isticmaalo xaqa kala horreynta, haddii kireeyuhu shuruudo ka duwan ku sheegin ogeysiiska, waa in uu qiimaha maguurtada ku bixiyaa soddon maalmood gudahood, laga billaabo marka ogeysiiska uu gaaray milkiilaha, isla markaana la sameeyaa heshiiska iibka, ama midka hordhaca ah.

5. Haddii maguurtada ay ka ijaaraan tahay dad badan, qof kasta oo ka mid ah kireystayaasha gooni ahaantii ayaa loo gaarsiinayaa ogeysiiska.

6. Xaqa kala horreyta wadajir waa u isticmaali karaan kireystayaashu, ama marka qaar ka mid ahi ka tanaasulaan, inta hartay ama midka haray ayaa isticmaali kara.

7. Axkaanta qodobkan lagu dhaqmi maayo marka ay joogto xaaladaha ku sheegan Qodobka 748aad ee Xeerka Madaniga.

Qod. 13aad

(Beec-fur)

1. Haddii milkiiluhu uu gabo in uu gaarsiiyo kireystaha ogeysiiska ku tilmaaman qodobka hore, ama ay caddaato qiimaha uu ogeysiiska ku sheegay in uu ka badnaa midka ku yaal qoraalka beeca maguurtada, qofka leh xaqa kala horreynta, muddo ku siman lix bilood gudahood, laga billaabo maalinta heshiiska la minguuriyey wuxuu maguurtada ka soo ceshan karaa iibsadaha ama inta dambo xaq u yeelatay.

2. Marka la isticmaalo xaqa ceshadka, qiimaha waa in la bixiyaa saddex bilood gudahood, laga bilaa bo taariikhda fadhiga u horreeya ee Maxkamadda, ha dii aan is hortaag laga keenin, ama maalinta uu ka hel-ay iibsadaha, ama kuwii kaloo ka sii iibsaday ama xaq ku y ha, ogeysiis ay ku wargeliyeen, fadhiga Maxkam adda ka hor, in ayan codsigiisa ishortaag ka lahayn.

3. Haddii Iibsaduhu, ama qofkii kaloo xaq dam be ku yeeshay maguurtadaas, uu ishortaag ka keeno ku isticmaalka xaqaas, muddada saddexda bilood ah waxay ka billaabaneysaa marka xukunka dacwadda la gu dhammeeyey uu kama dambeys noqdo.

Qod. 14aad

(Xaqa ku kala horreynta

heshiisyada la cusbooneysiiyey)

1. Marka kireeyuhu uu doono in uu maguurtada ~~qof saddexaad ka~~ ijaaro, dhammaadka heshiiska la cu sbooneysiiyey, waa in uu kireystaha gaarsiiyaa ijaarka loo joogo, kuna ogeysiiyaa fursad xafidan oo jawaab celin leh, lixdan maalmood ka hor dhammaadka mud-dada heshiiska.

2. Waajibkaas lagu yeelan maayo kir yaha mar-ka uu jiro qoraal kireystuhu uu ku sheegay inuusan dooneynin cusbooneysiinta heshiiska ijaarka.

3. Kireystuhu wuxuu hormarin ka yeelanaya qof kastoo kale haddii uu soddon maalmood gudahood, la ga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska ku tilmaa man xubinta koowaad, uu oggolaado qiimo iyo shuruu do lamid ah kuwa uu kireeyuhu u soo bandhigay.

4. Kireystaha xaqaas waa u taagnaanayaa xataa marka uu sannad gudihii ku go'o heshiiska ijaarka dhe xmaray kireeyaha iyo kireystaha cusub.

Qod. 15aad

(Baaba)

Waa wax kama jiraan haddii dhinacyadu heshiis ku gaaraan in ijaarku baaba'ayo marka maguurtada la wareejiyo.

Qod. 16aad

(Kharajka diiwaangelinta)

Kharajka diiwaangelinta heshiiska ijaarka wuxuu si siman u saaran yahay kireeyaha iyo kireystaha.

Qod. 17aad

(Kharajka dheeraadka ah)

Dhammaan kharajyada la xiriira hawlaha nadaafadda, biyaha, korontada, banneynta bulaacadaha iyo musqulaha iyo kharajyada ku baxa Adeegyada kale ee wadajirka looga faa'iideysto, wuxuu saaran yahay kireystaha, haddii aan si ka duwan loogu heshiin.

Qod. 18aad

(Maguurtooyinka lagu qabto hawlo gaar ah)

Heshiisyada ijaarka iyo sii ijaaridda maguurtooyinka xarumaha u ah Iskaashatooyinka ama ururrada bulshada, iyo kuwa loo isticmaalo gole maaweelo, caafimaad, hiddo iyo waxbarasho, muddadoodu waa afar Sano, waxaana lagu dhaqayaa qodobbada Sharcigan ee dabeecadda hawlahaas la socon kara.

MADAXA LABAAD

Axkaanta muddada kala guurka ah

Qod. 19aad

(Muddada heshiisyada socda ee cusbooneysiinta loogu talo galay)

1. Heshiisyada ijaarka ku tilmaaman Qod. 2aad, socdayna marka uu dhaqan galay Sharcigan, dhinacyaduna ay ugu talo galeen in la cusbooneysiin karo, waxay soconayaan Afar Sano.

2. Muddada kor ku sheegan waxay ka billaabaneysaa maalinta xigta dhammaadka muddada heshiiskii socday.

3. Haddii ay suuragal noqon weydo in maalintaas la aqoonsado, muddada cusub waxay ka billaabaneysaa taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

4. Dhinacyadu waxay sameysan karaan heshiis cusub oo Sharcigan waafaqsan, iyadoo weli lagu jiro muddada heshiiskii hore.

Qod. 20aad

(Korosiimada kirada)

1. iyo sii-ijaaridda til-
kala qortay 31ka
ber ka ay dhiga
kordhin karaa, weydiisto
laga billaabayo 1da
ka Sharcigan, lacag aan ka laba-
tan (20%).

2. Haddii taariikhda kor ku sheegan kaddib kireeyuhu uu kordhiyey intii hore loogu heshiiyey, kireystaha waxaa lagu yeelan karaa farqiga u dhexeeya kororsiimada xubinta hore ku sheegan iyo inta uu bixiyey.

Qod. 21aad

(Xaqa ku kala horreynta iyo magdhowga)

1. Marka ay dhammaato muddada ku tilmaaman Qod. 19aad, kireeyuhu waa in uu warqad xafidan oo jawaab celin leh ku ogeysiiyaa kireystaha, ugu yaraan lixdan maalmood ka hor taariikhda heshiisku dhammaanayo, shuruudaha uu rabo in uu ku sii wado ijaarka, ama inta uu ka haysto dad kaloo daneynaya maguurtada.

2. Waajibkaas lagu yeelan maayo kireeyaha marka uu jiro qoraal kireystuhu uu ku sheegay in uusan dooneynin cusbooneysiinta heshiiska ijaarka.

3. Sidoo kale kireeyaha lagu yeelan maayo waajibkaas, marka uusan dooneynin in uu cusbooneysiiyo heshiiska, isagoo tiigsanaya sabab ka mid ah sababaha ku sheegan Qod. 4aad.

4. Kireystuhu waa in uu soddon maalmood gudahood, laga billaabo marka uu helay ogeysiiska xubinta koowaad ku tilmaaman, ku wargeliyaa kireeyaha u diyaar ahaantiisa inuu ijaarka ku wato shuruudaha cusub.

5. Kireystuhu wuxuu xaqa kala horreynta yeelanayaa haddii soddon maalmood gudahood, laga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska ku sheegan xubinta koowaad, uu oggolaado shuruudo la mid ah kuwa kireeyuhu uu u soo bandhigay, xaqaas wuxuu kaloo yeelanayaa xataa xaaladaha ku tilmaaman Qod. 14aad.

6. Haddii kireystuhu uu aqbali waayo shuruudaha kireeyaha, ama uu isticmaali waayo xaqa kala horreynta, ~~wuxuu xaq~~ u yeelanayaa magdhow gaarayaa 18 bilood kiradooda, ama 21 bilood, haddii meeshu ta~~hay hoteel,~~ warshad ama farmashiye, waxaana laga qiyaasayaa kirada uu weydiistay kireeyuhu, ama midda qofka kaloo ka danta leh uu keenay.

7. Haddii kireeyuhu uusan dooneynin inuu cus- heshiiska ijaarka, kireystuhu wuxuu xay
u magdhow gaaraya 18 bilood kiradooda, marka meeshu tahay hoteel, warshad waxaana laga qiyaas qaadanayaa
u dambeysay ee uu bixiyey.

8. kaloo xaq u yeelanayaa magdhowga ah ee ku tilmaaman Qod. 8aad, xubintiisa marka la helo shuruudaha halkaas ku tilmaaman.

9. Fulinta go'aanka banneynta maguurtada waxaa shardi u ah bixinta magdhowga xubinta toddobaad ku sheegan, magdhowga ku tilmaaman xubinta siddeedaad waxaa la bixinayaa bilowga hawsha cusub.

Qod. 22aad

(Maguurtooyinka lagu qabto hawlo gaar ah)

Heshiisyada ijaarka ee ku tilmaaman Qod. 18aad, waxaa lagu dhaqayaa qodobbada 19aad iyo 20aad.

Qod. 23aad

(Heshiisyada socday ee aan loogu talo gelin cusbooneysiin)

1. Axkaanta ku sheegan Qodobbada 2 iyo 18 waxaa lagu dhaqayaa xataa heshiisyada muddadoodu socotay markay uu dhaqan gelay Sharcigan, in la cusbooneysiiyana ayàn dhinacyadu ugu talo gelin, waxaana laga jarayaa muddada ku sheegan qodobbadaas, inta ka go'day muddadii hore loogu heshiiyey.

2. Si kastaba ha ahaatee, muddadu marnaba kama yaraan karto laba sano, laga billaabo taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

3. Axkaanta xubinta hore, waxaa lagu dhaqayaa xataa heshiisyada ijaarka maguurtooyinka Sharcigan uu ka hadlay oo taariikhda dhaqangalka Amarka laalidda dacwadaha ijaarka guryaha ganacsiga (Amarka Madaxweynaha JDS lambar 13, taariikh 13 Maajo 1981) ka hor ay ka taagneyd dacwad guri banneyn ah, ama muddadii lagu heshiiyey ay dhammaatay taariikhdaas kaddib.

4. Qiimaha kirada waa laga wada hadli karaa, kireeyuhuna waa weydiisan karaa kororsiimo aan ka badneyn boqolkiiba labaatan (20%).

Qod. 24aad

(Ka bixidda heshiisyada)

1. Kireeyuhu waa ka bixi karaa heshiisyada ku tilmaaman qodobbada 19, 22 iyo 23, isagoo cuskanaya sababaha ku sheegan Qod. 4aad, ogeysiiyeyna kireystaha ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda dhammaadka heshiiska. Kireeyuhu wuxuu ogeysiiska ku gudbinayaa warqad xafidan oo jawaab celin leh.

2. Xaaladda xubinta hore ku sheegan marka la helo, waxaa lagu dhaqmayaa qodobadda 5, 6, 8, 9, 10, 11 iyo 12.

Qod. 25aad

(Dacwadaha fulinta ah)

1. Dacwad kasta oo fulin ah, kuna saabsan guri ka saarid, taagneydna markii uu soo baxay Amarka Madaxweynaha JDS lambar 13, taariikh 13ka Maajo 1981, iyo dacwadaha la soo saaray xukun kama dambeys noqday taariikhdaas ka hor, waxaa lagu dhaqayaa shuruucdii hore.

2. Hase yeeshee Garsooraha Fulintu, isagoo tixgelinaya duruufta taagan, wuxuu lagu-fuliyaha siin karaa madal aan ka badneyn hal sano.

Qod. 26aad

(Burrin)

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 27aad

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 29 Disember 1981.

MADAXWENAHA JDS
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 74 ee 5.7.1981.
Dallacsiin Shaqaale.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee Da stuurka JDS.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. yahay 46 16.9.79 laguna dhaqan geliyey Dastuurka JDS.

ISAGOO Arkay Sharcigan Dhismaha Golayaasha Shacbiga Degaanada, maamulka Gobollada iyo Deg mooyinka lamb. yahay 6 ee 12.2.1980.

ISAGOO Tixgeliyay tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho, (KMG).

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo 1.5.81, waxaa Xeerkan lagu dallacsii yay hal darajo, J/le Xasan Maxamed Cumar, oo ka tir san Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, kaasoo ka muu jiyay goobta shaqada fir fir cooni, hawlkarnimo, iyo kacaannimo.

Qod. 2aad

Jaallahaas oo ay Darajadiisii hore ahayd F3, wa xaa la gaarsiiyay F2, waxaana mushaarkiisu noqona yaa Sh. So. 800, iyadoo loo raacinayo kororsiimada caa diga ah ee Shaqaalaha Dawladda.

Qod. 3aad

Xeerkani, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 5 Luulyo 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 4 bogga lamb. 240

Muqdisho, 22 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

XEER MASAXWEYNAHA JDS, L. 75 ee 29.71081.
Darajo ka beddelaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee Da stuurka JDS.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. yahay 46 ee 16.9.79 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka JDS.

ISAGOO Arkay Shahaadada marag kacaysa in Jaallahaasi soo dhamaystay Dugsiga Sare.

ISAGOO Arkay Qod. 19aad ee Sharciga Lamb. ya hay 5 ee 2:2.1980, oo xaq u siinaya in qofkii sita Sha haadada Dugsiga Sare lagu meeleeyo darajada (B10).

ISAGOO Tixgeliyey tala jeedinta Duqa Magaala lada Muqdisho, (KMG).

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga soo billaabo taariikhdu markay ahayd 1.1.79 waxaa J/le Maxamed Maxamud Sahal laga bedelay darajadii hore, kaddib markii uu la yimid Shahaadada Dugsiga Sare.

Qod. 2aad

Jaalle Maxamed Maxamud Sahal, wuxuu ku mu shaar qaadan doonaa darajada (B10/2), mushaarkii suna waa 490, waxaana loo raacinayaa lacagta koror siimada Guud ee Shaqaalaha Dawladda.

Qod. 3aad

Xeerkani, wuxuu dhaqan gelayaa marki uu soo saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 29 Luulyo 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 6 bogga lamb. 133

Muqdisho, 14 Sebtember 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 76 ee 30.8.1981
Dib u sixid Xeerka Lamb. DH.MG.XQ.01.81.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82 (xubinta 14aad) ee JDS. Soomaaliyeed.

ISAGOO Arkay Xeerka lamb. 46 ee 16.9.79 ee ku dhaqan galay J.D.S.Soomaaliyeed.

ISAGOO Arkay sharciga dhismaha G/Shacbiga degaanada, maamulka gobollada iyo degmooyinka ee Lamb. 6 soona baxay 12.2.80.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. DH.MG.XQ,02,81 ee lagu dalacsiiyey hal derejo J/le Xasan Jimcaale oo ah kormeere kawaan laguna soo gudbiyay warqadda Lamb. JDS XM. E.1,278.81 ee 9.2.81 kaasoo halkaan ku lifaaqan.

ISAGOO Ogaaday in Xeerkaas aan la diiwaan gelin qalad galay awgeed.

ISAGOO Tixgeliyay tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu waxaa Xeerkaan dib loogu saxay xeerka Lam. XQ.02.81, kaasoo hal derejo lagu dalacsiiyay J/le san Hiraabe Jimcaale.

Qod. 2aad

J/le Xasan oo horav [illegible]

Qod. 3aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 30 Agoosto 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 6 bogga lamb. 136

Muqdisho, 14 Sebtembar 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 77 ee 30.7.1981. Dallacaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82 (xubinta 14aad) Dastuur ka JDS,

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. 46 ee 16.9.79 ee ku dhaqan galay Dastuurka JDS.

deegaanada, maamulka gobollada iyo degmooyinka Lamb. 6 soona baxay 12.2.80.

ISAGOO Arkay sharciga Lamb. 49biis ee 1.1.80.

ISAGOO Tixgtliyay tala jeedinta G/Joogtada ee G/shacbiga deegaanada Xamar.

ISAGOO Ay ugu muuqatay in ay tahay lagama maarmaan in J.lt G/le Dhexe Cali Xirsi Maxamuud oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta deegaanka Xamar la dallacsiiyo hal derejo.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo maalinta ay taariikhdu ahayd 15.8.81 waxaa xeerkaan lagu dallacsiiyay hal derejo J.le G.dhexe Cali Xirsi Maxamuud waxaana loo aqoonsa day derejada G.le Sare ee Ciidanka Ilaalinta deegaanka Xamar laga bilaabo taariikhda kor ku xusan..

Maadaama uu ka muujiyay goobta shaqada dadaal, kacaanimo, xilkasnimo, waayo aragnimo, daacadnimo iyo u dabacsanaanta hawlaha qaranka.

Qod. 2aad

J.le Cali Xirsi Maxamuud oo horay ugu jiray derejada G.le dhexe ee Ciidanka Ilaalinta degaanka Xa-

mar, wuxuu u dallacay derejada ah G/le Sare, wuxuuna ku mushaar qaadan doonaa darajada loo dallacsiiyay, kaasoo dhan Sh. So. 1.600 iyo kororsiimada guud ee dawladda.

Muqdisho, 30 Agoosto 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaankalamb. 6 bogga lamb. 134

Muqdisho 14 Sebtembar 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali